

Barnaamijka Summer of Safety ee Seattle Parks and Recreation ayaad kahelaysaa nashaadaad nidaamsan iyo goob amaan uleh dhalinta

Seattle Parks and Recreation ayaa bixinaysa Summer of Safety (SOS), kaasoo ah barnaamij lacag la'aan ah oo aad kahelayso nashaadaad nidaamsan iyo goob amaan leh oo loogu talagalay dhalinta aan kuxirnayn barnaamijyada kale ee xiliga xagaagaha oo lakormeero. Barnaamijku wuxuu kudadaalayaa inu u adeeggo dhalinta qoomiyadaha kaladuwan ee qoysaska danyarta ah kasoo jeeda.

SOS waxay kashaqayn doontaa shan xarun bulshood ayadoo kashaqaynaysa maalmo kaladuwan xiliga xagaaga oo dhan (kafiiri jadwalka hoose). Inta badan xarumuhu waxay bixinayaan qado lacag la'aan ah ayagoo kaashanaaya Barnaamijka Adegga Cuntada ee Xiliga Xagaaga. Nashaadaadka joogtada ah ee SOS waxaa kamid ah safaro dalxiis gaaban, farshaxano iyo wax sawirid, iyo sidoo kale isboortis iyo ciyaaro. Barnaamijka wuu shaqaynayaa xili roob ma qorax ay jirto umana baahna inaad iskadiiwaangaliso; dhalintu waxay soogali karaan maalintay doonaan xiligay doonaan inta lagu jiro saacadah shaqada tooska ah ee barnaamijka.

Jadwalka barnaamijka Summer of Safety:

Bitter Lake Community Center	Isniinta, Talaadada, Khamiista, Jamcada, 11a.m. ilaa 5 p.m., 7/2-8/24.	Qadada iyo Cuntooyinka fudud ee u bixiyo Barnaamijka Summer Food Service Program.
Delridge Community Center	Isniinta ilaa Khamiista, 11 a.m. ilaa 5 p.m., 7/2-8/31	Cuntooyinka fudud ayaa labixinayaa
Rainier Community Center	Isniinta, Arbacada, Khamiista, 12-5 p.m., 6/25-8/31	Qadada iyo Cuntooyinka fudud ee u bixiyo Barnaamijka Summer Food Service Program.
South Park Community Center	Isniinta – Jamcada, 12-5 p.m., 6/25-8/24	Qadada iyo Cuntooyinka fudud ee u bixiyo Barnaamijka Summer Food Service Program.
Van Asselt Community Center	Isniinta ilaa Jamcada, 12 – 5 p.m., Luuliyo 2 ilaa Agoosto 31	Qadada iyo Cuntooyinka fudud ee u bixiyo Barnaamijka Summer Food Service Program.